Xeerka JRA/JRC- Diiwanada/Siideynta Warbixinta Ardayda

Aqoonsiga dhaqanka qarsoodiga diiwaanka waxbarashada ardayga, ma jiro qof ama hay'ad heli karto diiwaanka ardayga iyada oo aan jirin heshiis hore oo qoraalka waalidka/masuulka ardayga ama **ardayga xaqa u leh, markii laga reebo sida lagu qeexay sharciga iyo xeerkaan.**

Kormeeraha guud ama wakiilka ayaa bixinayo maamulka ku haboon diiwaanada ardayga sida waafaqsan sharciga, oo ay ku jiraan fullinta talaabooyinka illaalinta iyo nidaamyada la xiriiro helitaanka iyo siideynta diiwanada waxbarashada ardayda.

Heshiiska iyo haynta diiwaanada waxbarashada ardayda

Maamulaha waa xanaanada rasmiga ah ee diiwaanada oo dhismihiisa/dhismaheeda ah.

Diiwaanada waxbarashada ardayda oo nooc walba ah iyo warbaahinta, oo ay ku jiraan sawirada iyo korontada, waa diiwaanada sida tooska ah u quseeyo ardayga. Diiwaanka waxbarashada ardayga laga yaabo in ay wadato, laakin muhiim ma noqoneyso in la xadido, warbixinta xigta: Xogta aqoonsiga; shaqada waxbarashada la dhameystiray; xeerka guulaha (fasalada, buundooyinka heerarka guulaha imtixaanka); xogta ka soo qeybgalka; dhibcaha heerarka sirdoonka, baaritaanka aqoonta iyo cilmi nafsiga; natiijooyinka alaabaha danaha; warbixinta caafimaadka iyo daawada; warbixinta aasaaska qoyska; qiimeynta macalinka ama la taliyaha iyo aragtiyada; wargelinta halista ama nidaamyada dhaqanka soo noqnoqanayo iyo barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP).

Diiwaanada waxbarashada ardayda kuma jiraan diiwanada ay hayaan qeybta fullinta sharciga ee dugsiga ama dugsiga degmada oo ay aasaaseen qeybtaas oo ujeedada fullinta ah.

Ma jiro wax ku jiro xeerkaan oo ka celinayo maamulayaasha, macalimiinta ama shaqaalaha siideynta warbixinta aad ku heshay aqoonta shaqsiga ama dhawrida iyo ka ma helin diiwaanada waxbarashada ardayga.

Sida waafaqsan sida sharciga quseeyo, wuxuu codsanayaa baaritaan iyo dib u eegis diiwaanada waxbarashada ardayga ah, wuxuu codsadaa koobiyaal diiwaano noocaas ah, iyo siideynta warbixinta shaqsiyada lagu garan karo halkaas waxaa lagu celinayaa sida qeyb ka ah diiwaanka waxbarashada arday kasta.

Shaqaalaha dugsiga waxay isticmaalayaan wadooyin macquul ah oo lagu xaqiijiyo aqoonsiga waalidka, ardayga, saraakiisha dugsiga, iyo xisbi kale ee sadexaad oo kuwa ay ka siideynayaan diiwanada waxbarashada ardayga ah. Xaqiijinta aqoonsiga ka hor siideynta diiwaanada korontada iyadoo sir la isticmaalayo ama talaabooyinka kale ee amniga lagu qiimeynayo ayaa loo baahanyahay.

Helitaanka diiwanada waxbarshada ardayga ee waaladiinta iyo ardayga xaqa u leh

Waalidka/masuulka ("waalidka") wuxuu xaq u leeyahay in uu baaro iyo dib u eego diiwaanada waxbarashada carruurtooda, hadii ardayga uu ka hooseeyo 18 sanno jir. Hadii ardayda uu yahay 18 sano jir ama uu ka weynyahay ("ardayga xaqa u leh"), ardayga wuxuu baari karaa ama dib u eegi karaa diiwaanadiisa/diiwanadeeda iyo bixin karaa heshiis qoraal ah oo siideynta diiwaano

noocaas ah iyo warbixinta shaqsiga lagu aqoonsan karo oo ku jirta. Si kastaba, waalidka sidoo kale xaq ayuu uleeyahay in uu helo diiwaanada waxbarashada carruurteeda/carruurtiisa, aan ka aheyn heshiis qoraal la'aantiisa oo ardayga xaqa u leh ah, hadii ardayga xaqa u leh uu ku tiirsanyahay ujeedooyinka daqliga canshuurta federaalka ama siideynta ay ku xirantahay caafimaadka ama degdega amniga. Helitaanka diiwanada ardayga oo waalidka ama ardayga xaqa u leh waa in ay waafaqsanaataa xeerka la jiro nidaamkaan.

Codsiga lagu bedelayo diiwaanada ardayga

Waaladiinta ama ardayda xaqa u leh waxay weydiin karaan degmada in ay bedelaan diiwaanka waxbarashada ardayga oo ay aaminsanyihiin in ay saxneen, marinhabaabin ama hadii kale ay ku xadgudbeyso xaquuqda gaarka ah ee ardayga. Fasalada ardayga lagama hor imaan karo sida waafaqsan xeerkaan . Codsiga lagu bedelayo diiwaanka waxbarashada ardayga waxay waafaqsanaaneysaa xeerka nidaamkaan la jiro.

Siideynta oo ay la jirto heshiis qoraal ah

Xili walba oo degmada ay u codsato sharci ahaan ama xeer lagu raadinayo heshiis qoran ka hor siideynta warbixinta shaqsiga lagu aqoonsado oo diiwaanka waxbarashada ardayga ah, ogeysiinta la siinayo waalidka ama ardayga xaqa u leh waa in ay la jirtaa sidaan xigta:

a. Diiwaanka gaarka ah oo la siideynayo;

b. Sababta gaarka ah oo siideyn noocaas ah;

c. Aqoonsiga gaarka ah oo qof walba ah, wakaalada ama hay'ada codsaneyso warbixin noocaas ah iyo warbixinta loogu talagalay in la isticmaalo;

d. Wadada ama qaabka oo diiwanada lagu siideynayo; iyo

e. Xaquuqda dib loogu eego ama loo helo koobiga diiwaanka la siideynayo.

Heshiiska waalidka ama ardayga xaqa u leh waa in ay ku shaqeeyaa kaliya tusaalaha gaarka ah oo la siiyay. Heshiiska ka soo qeybgalka ardayga oo koorso walba ah, hawlaha dugsiga, barnaamijka waxbarashada gaarka ah ama barnaamij walba oo dugsiga ah ma noqoneyso qoraal heshiis gaar ah oo uu rabo xeerkaan.

Mar hadiiba waalidka ama ardayga xaqa u leh ay bixiyaan heshiis qoraal ah, degmada sidoo kale waxay midkood hayneysaa foomka heshiiska saxiixan ama waraaqaha ay u heshay heshiis qoraal ah oo Xarunta aan la Qiyaasi karin ah.

Siideynta oo aan la jirin heshiis qoraal ah

Degmada waxaa laga yaabaa in ay sii deyso diiwaanka waxbarashada ardayga ama warbixinta shaqsiga lagu aqoonsan karo oo halkaas ku jirto iyada oon la jirin heshiis qoraal ah oo waalidka ama ardayga xaqa u leh hadii siideynta ay buuxiso mid kamid ah sharuudahaan xiga:

1. Siideynta waa saraakiisha dugsiga iyagoo leh dan waxabarsho sharci ah oo diiwaanka ardayga ah ama warbixinta shaqsiga lagu aqoonsan karo ee ku jirta halkaas. Sida waafaqsan sharciga, kaliya saraakiisha dugsigaas oo sharci u leh danaha waxbarashada sida lagu sharaxay xeerkaan waxaa loo ogolyahay helitaanka diiwaanada waxbarashada ardayga u gaarka ah.

a. Ujeedada xeerkaan, "sarkaalka dugsiga" waa shaqsi u shaqeeyo degmada sida maamule, kormeere, macalin ama shaqaalaha taageerada (oo ay ku jiraan caafimaadka ama shaqaalaha caafimaadka iyo qeybta shaqaalaha fullinta sharciga); qof u adeegayo Guddiga Waxbarashada; qofka ama shirkada oo ay degmada u xilsaartay adeegyada ama shaqooyinka waxaa hadii kale waxaa loo isticmaalayaa in lagu qabto (sida abuukataha, hantidhooraha, la taliyaha ama dhaqtarka); waalidka ama ardayga u adeegayo guddi rasmi ah, sida edbinta ama guddiga cabashada; ama waalidka, ardayga ama tabaruce kale oo caawinayo sarkaal dugsi kale oo qabanayo shaqadiisa/shaqadeeda.

b. sarkaalka dugsiga wuxuu leeyahay "dano waxabarasho sharciyeed" hadii siideynta sarkaalka dugsiga uu u yahay: (1) muhiim sarkaalkaas si uu u qabto shaqooyin ku haboon oo lagu sharaxay tilmaanta booskiisa/booskeeda ama heshiis qandaraas ah; (2) lagu isticmaalay xaalada gudaheed oo ganacsiga degmada rasmiga ah iyo kuma ahan ujeedooyin ay ka faa'ideysanayaan dhinacyada saraakiisha masuulka ah; (3) waafaqsan dhameystirka shaqada qaarkood ama go'aaminta ardayga; iyo (4) waafaqsan ujeedooyinka xogta loo keydinayo.

2. Siideynta waa saraakiisha dugsi kale, nidaamka dugsiga ama machadka dugsiga sare ee horay u codsaday diiwaanada iyo ardayga uu raadinayo ama rabo in uu iska diiwaangeliyo, ama iska diiwaangeliyay. Diiwaan kasta oo la soo diro xiliga lagu gudo jiro codsiga ardayga ama xiliga wareejinta wuxuu dhameystirayaa, la cusbooneysiiyay ama la saxay sida muhiimka ah.

3. Siideynta waa in ay ansixiyaan wakiilada Kormeeraha Guud ee Mareykanka, Xeer ilaaliyaha Guud ee Mareykanka, Xoghayaha Waaxda Waxbarashada Mareykanka, ama gobalka iyo maamulada waxbarashada deegaanka.

4. Siideynta waxay ku xirantahay codsiga ardayga oo, ama helida, dhaqaale gargaar ah .

5. Siideynta waa gobalka iyo saraakiisha deegaanka iyo walaacyada awooda nidaamka cadaalada carruurta si ay si wanaagsan ugu adeegto, garsoorida ka hor, ardayda diiwaankooda la xiray sida ku qeexan sida waafaqsan Xeerka Diiwaanada Furan ee Colorado iyo Xeerka Carruurta Colorado. Diiwaano noocaas ah iyo warbixinta shaqsiga lagu aqoonsado waa in la siidaaya kaliya goortii xaqiijin qoraal ah oo ka imaanayo saraakiisha oo ah diiwaanada iyo warbixinta in aan loo siideyneynin xisbi sadexaad oo kale, aan ka aheyn ogolaansho gaar ah ama sharciga u baahdo, iyadoon la heyn heshiis qoraal oo hore oo waalidka ama ardayga xaqa u leh.

6. Siideynta waa ururada sameynayo daraasadaha oo, ama matalayo, hay'adaha waxbarashada ama machadyada si loo hormariyo, loo qiimeeyo ama baaritaanada maamulida saadaalinta; si ay u maamulaan ardayga barnaamijyada gargaarka; ama loo wanaajiyo waxbarashada.

7. Siideynta waa siinta hay'adaha oo ogolaanshaha hawlaha ah.

8. Siideynta waxay ku socotaa waalidka leh ardayga xaqa u leh iyo ardayga in uu ku tiirsanyahay ujeedooyinka canshuurta IRS.

9. Siideynta waxay ku xirantahay xaalada degdega ah, hadii ogaanshaha warbixinta ay muhiimka tahay si loo ilaaliyo caafimaadka ama amniga ardayga ama dadka kale.

10. Siideynta waa in loo hogaansanaado amarka maxkamada ama codsiga maxkamada sharciyeysan. Ilaa laga sharaxo amarka ama codsiga maxkamada, degmada waa in ay sameysaa dadaal suurtogal ah oo lagu ogeysiinayo waalidka ama ardayga xaqa u leh ka hor inta aan loo hogaansamin amarka ama codsiga maxkamada.

11. Siideynta waa mid ka mid ah "diiwaanka warbixinta" sida lagu qeexay xeerkaan.

Siideynta warbixinta diiwaanka

Warbixinta diiwaanka waxaa sidoo kale lagu siideyn karaa iyadoo laheyn heshiis qoraal ah oo waalidka ama ardayga xaqa u leh. "Warbixinta diiwaanka" waxay la mid tahay warbxixinta ku jirto diiwaanka waxbarashada ardayga oo aan guud ahaan loogu tixgelineyn waxyeelo ama dhaxgelida arimaha gaarka hadii la siidaayo. Warbixinta diiwaanka oo laga yaabo in lasiidaayo waxaa ku jira laakin kama xadidno magaca ardayga, cinwaanka i-meelka, sawirka, taariiqda iyo goobta dhalashada, qeybta weyn ee waxbarashada, ka qeybqaadashada hawlaha sida rasmiga ah loo aqoonsanyahay iyo ciyaaraha, miisaanka iyo dhirirka xubnaha kooxyada ciyaaraha, taariiqda ka qeybgalka, heerka fasalka, heerka diiwaanka, heerarka, sharafeynta iyo abaalmarinta la helay, hay'ada waxbarashada hadeer ee ugu dambeysay ama wakaaladaha uu ardayga ka soo qeybgalay, iyo warbixin kale ee lamid ah. warbixinta diiwaanka sidoo kale waxaa kujira lambarka aqoonsiga ardayga ama aqoonsiga kale ee gaarka ah ee lamid ka ee ku mmujisan kaarka Aqoonsiga ardayga ama ardayga uu isticmaalo si uu ugu galo ama kula xiriiro nidaamyada korontada, laakin kaliya hadii aqoonsadaha aan loo istcimaali karin in lagu helo gelitaanka diiwaanada waxbarashada ardayga aan ka aheyn goortii lagu isticmaalo iyadoo la kaashanayo hal ama arimo badan oo xaqiijineyso aqoonsiga isticmaalaha, sida sir uu garanyo kaliya isticmaalaha u sharciyeysan.

Taleefon lambarka ardayga iyo cinwaanka waa in aan la wadaagin sida waafaqsan qeybtaan.

OGOW: FERPA waxay u baahantahay in degmada ay soo ogeysiiso waaladiinta iyo ardayda xaqa uleh xaquuqdooda ay ku diidaan in la siidaayo warbixinta diiwaanka. 34 C.F.R. 99.37(a)(2). Degmada waa in ay qeexaan "xiliga waqtiga" oo waalidka/ardayda xaqa uleh loogu sheegayo degmada in aysan siideyn warbixinta diiwaanka. 34 C.F.R. 99.37(a)(3). sadarka xiga wuxuu buuxinayaa sharuudaha "xiliga waqtigaan". Ugu dambeynta ogeysiinta waa in ay ahaataa waqti macquul ah (tusaale. 2-3 isbuuc) dugsiga markuu bilowdo ka dib si loogu ogolaado go'aangaarka waalidka/ardayda hadii warbixinta diiwaanka la siideyn karo iyadoon jirin heshiis qoraal hore.

Waaladiinta iyo ardayda xaqa u leh waxay xaq uleeyihiin in ay diidaan ogolaanshaha tilmaamaha mid kasta ama qeybaha oo dhan ee warbixinta diiwaanka hadii diidma noocaas ah lagu helo qoraal ahaan oo xafiiska masuulka dugsiga goobta ardayga uu ka qeybgalo ah oo aan ka dambeynin 15-ka Sebteembar ama Isniinta xigta hadii 15-ka Sebteembar ay noqoto Sabti ama

Axad.

Usiideynta warbixinta edbinta shaqaalaha dugsiga

Sida waafaqsan sharciga gobalka, masuulka ama wakiilka waa in uu la soo xiriiraa warbixinta edbinta la xiriirta arday kasta oo ka diiwaan gashan dugsiga oo macalin kasta oo la leh xiriir toos ah ardayga fasalka iyo la taliye kasta oo toos ula xiriiro ardayga. Macalin ama la taliye kasta oo warbixinta edbinta la soo wargeliyay waa in uu joogteeyaa qarsoodiga warbixinta iyo waa in uu san la xiriirin qof kasta oo kale.

Sharciga gobalka wuxuu u baahanyahay masuulka ama wakiil soo wargelinayo ardayga iyo waalidka ardayga goortii warbixinta edbinta la soo wargeliyo iyo la siiyo koobi oo warbixinta edbinta la wadaagay ah. Ardayda iyo/ama waalidka ardayga laga yaabo in ay ka hor imaadaan saxnaanta warbixinta edbin noocaas ah iyadoo la marayo nidaamka lagu sheegay xeerkaan iyo sharciyada la socda.

U siideynta saraakiisha shaqaaleysiinta milateriga

Magacyada, cinwaanka iyo lambarada taleefonka guriga, sidoo kale sida warbixinta diiwaanka, oo dugsiga sare ardayda waa in loo siidaayaa saraakiisha shaqaaleysiinta militariga 90 maalmood gudahood ee codsiga ah, ilaa waalidka ama ardayga ay gudbiyaan codsi qoraal ah oo warbixin noocaas in aan la siideyn. Qarashaadka suurtogalka ah iyo dhaqanka dhabta ah oo si toos uga dhacdo degmada oo bixinta warbixintaan waxaa la bixinayaa adeegyada la codsanayo.

U siideynta Caafimaadka

Dacwadaha oo dhan oo ardayda ay ka diiwaan gashantahay barnaamijka Caafimaadka Colorado, degmada waa in ay siideysaa warbixinta diiwaanka oo ka kooban magaca ardayga, taariiqda dhalashada iyo jinsiga (lab/dheddeg) oo Xeerka Daryeelka Caafimaadka iyo Maalgelinta (wakaalada Daryeelka-caafimaadka Colorado) si loo xaqiijiyo Daryeelka-caafimaadka xaq u lahaanshaha ardayda. Degmada waa in ay ka helaaan heshiis qoraal ah oo sannadla ah waalidka ka hor inta aan la siideyn warbixinta kasta oo biilasha u baahan. Si loo gaaro midaan, degmada waa in ay:

Ogow: dooro hal ama kuwa badan oo ka mid ah kuwa xiga.

- oo ay ku jiraan foomka heshiiska oo ay la jiraan "bilowga dugsiga" warbixinta dhacid walba.
- oo ay ku jiraan foomka heshiiska oo ay la jiraan baakida qalabyada IEP.
- oo ay ku jiraan bixinta ogolaanshaha foomka Xaaladaha Degdega Caafimaadka.

U siideynta Guddiga Waxbarashada Sare (CCHE)

Diseembarta ama ka hor 31-ka Diseembar oo sannad walba oo dugsiga ah, dugsiga degmada waa in ay u siidaayaan CCHE magacyada iyo cinwaanka dirista oo ardayda ka diiwaan gashan fasalka sideedaad oo isticmaalka ku dirista ogeysiinta fursadaha waxbarashada dugsiga sare ee

hore iyo tilmaamaha diiwangelinta waxbarashada sida looga baahanyahay sharciga gobalka.

Ogeysiinta sanadlaha xaquuqda

Degmada waa in ay soo ogeysiisaa waaladiinta iyo ardayda xaqa u leh xaquuqdooda sida waafaqsan xeerkaan bilowga sannad dugsiyeed walba. Ogeysiinta waaladiinta ama ardayda xaqa u leh oo curyaanka ah ama luuqadooda koowaad ama luuqada hooyo ay tahay mid aan Ingiriis aheyn, qaabka ama nooca ogeysiinta waala bedelayaa marka waxay u badantahay suurtogalka in la soo ogeysiiyo xaquuqdooda.

Koobi oo Xeerka Xaquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Arimaha Gaarka ah, iyo xeerkaan iyo sharciga la socdo iyo bandhigyadooda waxaa laga heli karaa xafiiska kormeeraha guud xiliga lagu guddo jiro saacadaha ganacsiga caadiga ah.

Sharciga maamulka

Degmada waa in ay u hogaansanaataa Xeerka Xaquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Arimaha Gaarka ah (FERPA) iyo xeerarkooda sidoo kale sida sharciga gobalka oo lagu maamulayo qarsoodiga diiwaanada waxbarashada ardayga. Degmada waxay xaq u leedahay in ay qaado ficilo kasta oo dhan iyo tababarka oo talaabo kasta oo ku sharciyaysan sida waafaqsan sharciga.

Dhacdada xeerkaan ama sharciga la socda ma sheego siinta gobalka quseeyo ama sharciga federaalka, ama aan isku mid aheyn ama qilaaf dhaxyaalo gobalka quseeyo ama sharciga federaalka, bixinta gobalka quseeyo ama sharciga federaalka waa in uu xakameeyaa.

(Taariiqda la soo saaray)

TIXRAACYADA SHARCIGA.: 20 U.S.C. 1232g *(Xeerka Xaquuqda Waxbarshada Qoyska iyo Arimaha Gaarka ah)*

20 U.S.C. 7908 *(warbixinta shaqo bixiyaha milatariga waxay ku jirtaa Xeerka Majiro Canug laga Tagay (No child Left Behind) ee 2001)*

34 C.F.R. 99.1 *et seq.(xeerarka FERPA)*

C.R.S. 19-1-303 iyo 304*(diiwaanada iyo warbixinta lagu wadaagay sida waafaqsan Xeerka Carruurta Colorado)*

C.R.S. 22-1-123*(degmada waa in ay u hogaansanaataa FERPA)*

C.R.S. 22-32-109 (1)(ff) *(waajibka lagu aasaasayo xeerka u siideynta magacyada ardayda fasalka sideedaad cinwaanka ku dirista ee Guddiga Waxbarashada Sare ee Colorado)*

C.R.S. 22-32-109.1(6) *(waajibaadka lagu aasaasayo xeerka lagu wadaagayo warbixinta waafaqsan sharciga gobalka iyo federaalka oo danaha ka dhigida dugsiga ammaan)*

C.R.S. 22-32-109.3 (2) *(waajibaadka lagu wadaagayo edbinta iyo warbixinta ka soo qeybgalka oo ay la jiraan hay''adaha cadaalada dambiyada)*

C.R.S. 22-33-106.5*(maxkamada oo ah in ay xaqiijiso xukunka dambiga xadgudubka galmada sharci darada ah)*

C.R.S. 22-33-107.5*(dugsiga degmada oo in ay soo ogeysiiyaan hadii ay ka soo qeybgali*

waayaan dugsiga)

C.R.S. 24-72-204 (3)(a)(VI) *(dugsiyada ma siideyn karaan cinwaanka iyo lambarka taleefonka iyadoon jirin heshiis)*

C.R.S. 24-72-204 (3)(d) *(warbixinta shaqaaleysiiyayaasha milariga)*

C.R.S. 24-72-204 (3)(e)(I) *(qodobada qaarkood ee FERPA waxaa dejiyay Sharciga Colorado)*

C.R.S. 24-72-204 (3)(e)(II) *(siideynta shaqaalaha oo warbixinta ay ku heleen aqoonsiga shaqsiga ama dhawrista)*

C.R.S. 24-72-205(5) *(qiimaha koobiyeenta diiwaanka bulshada)*

C.R.S. 25.5-1-116*(qarsoodiga diiwaanka HCPF)*

GUDUB TIXRAACA.: GBG, Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga/ilaalinta shaqaalaha

JK, Edbinta Ardayga

JLC, Adeegyada Caafimaadka Ardayga iyo Diiwaanada

JRCA*, La wadaagista warbixinta/diiwaanada ardayga inta u dhaxeyso Dugsiga Degmada iyo Hay'adaha Gobalka

KLMA, Xiriirada Shaqaaleysiiyayaasha Milatariga, Machadyada Dugsiga sare ee hore iyo Badrooniyada la Filanaayo